

# ISDIWAANGELINTA MAALINTA DOORASHADA

## Tus Caddayn Degganaansho

### 1. Warqad Aqoonsi (ID) Oo Leh Magacaaga Iyo Cinwaankaaga Hadda

- Shatiga dareewalka ee Minnesota oo aan dhicin, ruqsadda bartaha ama Warqad Aqoonsi; ama risiit kuwaan midkood ah.
- Warqadda Aqoonsiga Qabiil oo magac, cinwaan, sawir iyo saxiix leh.

### 2. Warqad Aqoonsi oo leh Sawir ayna weheliso Dukumiinti leh, Magacaaga iyo Cinwaankaaga Hadda

Warqadaha Aqoonsiga oo sawirka leh ee la aqbalayo Mid dooro. Hadduu rabo ha ahaado mid dhacay.

- Shatiga dareewalka, Warqad Aqoonsi ee gobol ama ruqsadda bartaha oo uu soo saaray gobol uun
- Baasaboor Maraykan ah
- Ciidamada Maraykanka ama Warqadda Aqoonsiga ee Askartii Hore
- Warqadda Aqoonsiga Qabiil oo magac, saxiix, iyo sawir leh
- Warqad Aqoonsi ee Jaamicad, kuleejo ama kuleejo farsamo ee Minnesota
- Warqad Aqoonsi ee dugsi saree ee Minnesota

Dukumiintiyada la Ogolyahay Mid dooro. Waxaa lagu tusi karaa qalab elektronik ah.

- Qaansheeg, koonto ama caddayn adeeg la bilaabay ama taariikhdiisu tahay 30 maalmood gudahood maalinta doorashada oo ah:
  - Taleefoon, TV ama internet
  - Qashinka, bulaacad, koronto, gaas ama biyo
  - Dukumiinti bangi ama kiridhit kaar
  - Ijaar ama mortgage
- Heshiis dheer oo deeggaansho ama heshiis kiro oo shaqaynaya ilaa Maalinta Doorashada
- Caddayn ah lacag arday bixiyo oo hadda ah

### 3. Codbixiye Diwaangashan Oo Xaqiijin Kara Cinwaankaaga

Codbixiye diwaangashan oo xaafadda deggan ayaa kuu raaci kara goobta codbixinta si uu u saxiixo dhaar xaqiijinaysa cinwaankaaga. Tan waxaa la yiraahdaa 'damaanad'. Codbixiye diwaangashan wuxuu damaanad qaadi karaa ilaa iyo sideed codbixiye. Adiga haddii cid ku damiinatahy adigu cid ma damiinan kartid.

### 4. Warqadda Aqoonsiga Ee Arday Kuleeja Dhigta Oo Ay Weheliso Liiska Guryaha Ardayda

Kuleejooyinka iyo jaamicaduhu waxay u soo diraan saraakiisha doorashada liiska guryaha ardayda. Haddii aadan ku jirin liiska, tus Warqaddaada Aqoonsiga ee arday kuleejo dhigta si aad u dhammays tirta isdiwaangelintaada.

### 5. Diiwaangelin Sharci Ka Ah Isla Xaafadda

Haddii aad xaafadda ka diwaangashan tahay laakiin aad magacaaga beddeshay ama meel kale oo isla xaafadda ah u guurtay, waxaad u baahan tahay oo kaliya in aad u sheegto garsooraha doorashada magacaagii ama cinwaankaagii hore.

### 6. Ogysiis Isdiwaangelin Daahsan

Haddii aad isdiwaangelisay si aad u codaysid 20 maalmood gudahood maalinta doorashada, waxaa laga yaabaa in boosta aad ka hesho Ogysiis Isdiwaangelin Daahsan. U isticmaal ogaysiiskaas caddayn degganaansho si aad isdiwaangelisid.

### 7. Qof Ka Shahaqeeya Xarun Degganaansho

Haddii aad ku nooshahay xarun degganaansho, qof shaqaale ah ayaa kuu raaci kara goobta codbixinta si uu u xaqiijiyo cinwaankaaga. Tan waxaa la yiraahdaa 'damaanad'. Qof shaqaale ah wuxuu damiinan karaa dhammaan codbixiyayaasha u qalma ee ku noon xarunta.

Arrimaha dhammaantood, sharciga iyo xeerka ayaa iska leh awoodda kama dambaysta ah.

Xoghayaha Gobolka, Qaybta Doorashooyinka, 180 State Office Bldg., 100 Rev. Dr. Martin Luther King Jr. Blvd., St. Paul, MN 55155-1299, (651)215-1440, Boggaa internetka: [www.sos.state.mn.us](http://www.sos.state.mn.us).